

Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo bixinta Biilasha korontada ee Qalabka Guryaha lagu Kululeyo Xiliga Qaboobaha?

Codso In laga Caawiyo Biilka Korontada ee Qalabka Guryaha lagu Kululeyo!

Waxaan ka caawinaa dadka dakhligoodu hooseeyo ee ku dhaqan Magaalada Cambridge iyo Somerville inay kaydsadaan lacagaha kaga bixi lahaa qalabka guryaha lagu kululeyo inta u dhaxaysa 1-da Nofeembar iyo 30-ka Abriil.

- Kiraystayaasha iyo mulkiilayaasha guryaha ayaa codsan kara.
- U qalmida waxay ku xirantahay dakhligaaga guud ee 4-ta toddobaad ah (eeg shaxda hoose). Waxaa loo baahanyahay in la helo dukumentiyada dakhliga iyo caddayn muujinaysa sida aad kulayl ugu baahantahay.
- Haddii ay duruufahaagu is beddeleen, waxa laga yaabaa inaad dhawaan buuxisay shuruudaha u qalmitaanka barnaamijka.
- Haddii aad u qalanto barnaamijka HEAP (oo horaan la dhihi jiray Fuel Assistance), shaqaalaheennu waxay kugu xidhi karaan barnaamijyada kale ee kaa caawinaya inaad kaydsato lacag iyo tamar.
- Xaaladaha degdega ah ee la xiriira Koronta Tagista:** Haddii aadan haysan korontada wax lagu kululeyo, aad heshay ogeysiis muujinaya in 72 saacadood ee xiga korontada laga jari doono, mise ay hantaada saalida ay buuxdo 1/8(sideed meel ha meel), waan ku caawin karnaa! Naga soo wac 617-665-6234 si aad u hesho gargaar isla maalintii ah.

Habraacyada Dakhliga Federaalka ee Barnaamijka HEAP (2025–2026)

Tirada Qoyska	4 - Dakhliga Guud ee Todobaadka (haddii la bixiyo toddobaadle ama labadii toddobaadba mar)	4 - Todobaadka Dakhliga Go'an (haddii la bixiyo bishiiba mar)	Wadarta Dakhliga Sannadlaha ah
1	\$3,982	\$4,314	\$51,777
2	\$5,208	\$5,642	\$67,709
3	\$6,433	\$6,970	\$83,641
4	\$7,659	\$8,297	\$99,573
5	\$8,884	\$9,625	\$115,504
6	\$10,110	\$10,953	\$131,436



Ka codso hab onlayn ah:

www.cambridgema.gov/HeatingHelp

Si aad u hesho caawimaad, kala xiriir Barnaamijka Cambridge Home Energy Assistance Program lambarka 617-665-6234 mise dhspfuel@cambridgema.gov



CITY OF
CAMBRIDGE

Human
Service
Programs

